

Newborn Screening Propel

Newborn Screening (NBS) Propel waxay muhiimada saaraysaa kor u qaadista nidaamka baaritaanka ilmaha dhashay ee dhammaan dhallaanka reer Minnesota iyo qoysaskooda. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (Minnesota Department of Health, MDH) ayaa iskaashi la samaysay RTI International si loo dhaqan gasho kooxaha diirada loona sameeyo xog uruurin si xog dheeraad ah looga ogaado khibradaha waalidiinta iyo daryeel bixiyaashu kala kulmeen nidaamka baaritaanka ilmaha dhashay. Waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha ilmaha dhashay iyo carruurta laga helay caabuqa Ilmuhu ku dhashaan (congenital cytomegalovirus, CMV) oo looga helay baaritaanka ilmaha dhashay ayaa lagu casuumayaa inay ka qaybgalaan. Adeeg bixiyaasha la shaqeeya ilmaha dhashay iyo carruurta qaba CMV ka ilmuhu ku dhasho ayaa sidoo kale lagu casuumay inay bixiyaan fikrado intii lagu jiray wareysiyada xog raadinta ee muhiimka ah.

Qoysaska kooxaha diirada iyo wareysiyada xog bixiyaasha muhiimka ah oo lala yeeshay adeeg bixiyaasha ayaa la soo gaba gabeeyay. Waad mahadsan tihii dhammaan intiinii ka qaybgashay!

Mashruucaan waxaa lagu maamulayaa maal gelinta federaalka oo ka timid [Division of Services for Children with Special Health Needs NBS Propel Awards \(https://mchb.hrsa.gov/about-us/our-offices-divisions/division-services-children-special-health-needs-dscshn/dscshn-awards-2023\)](https://mchb.hrsa.gov/about-us/our-offices-divisions/division-services-children-special-health-needs-dscshn/dscshn-awards-2023).

Waxaan helay warqad si aan u buuxiyo xog uruurinta. Ma tahay in aan ka qaybgalo?

Fikirkaaga ayaa muhiim noo ah. Haddii aad heshay warqad kugu casuumaysa inaad ka qaybgasho xog uruurin, fadlan iskuday in aad buuxiso. Dhammaan xogta lasoo uruuriyo ayaa ahaan doonta mid qarsoodi ah, xog kasta oo gaar ahna waa la burburin doonaa marka mashruucu dhammaado.

Dhallaanka iyo carruurta looga helay xanuunka baaritaanka ilmaha dhashay, waalidiinta iyo daryeeleyaasha carruurta laga helay xanuunka baaritaanka ilmaha dhashay, bixiyaasha daryeelka caafimaadka, iyo xirfadleyaasha caafimaadka dadwaynaha ayaa ka faa'iideysan doona xogta aan ka helno NBS Propel.

Xog uruurintu ma tahay mid qarsoodi ah?

Inkasta oo aysan ahayn mid qarsoodi ah, haddana dhammaan jawaabaha xog uruurintu waxay ahaan doonaan kuwo qarsoodi ah. Magacaaga iyo magaca ilmahaaga ayaan marna loo baahin doonin in laga helay xanuunka CMV ee lagu dhasho, inaad buuxisay xog uruurinta, ama in lagaa codsaday inaad ka qaybgasho.

Ma qasab baa inaan ka qaybgalo xog uruurinta?

Maya. Ka qaybgalkaagu waa ikhtiyaari. Ma jiro wax kugu dhacaaya haddii aad diido in aad ka qaybgasho. Waad ka boodi kartaa su'aasha aad doonto, waadna joojin kartaa marka aad doonto.

Waa maxay su'aalaha ku jira xog uruurinta?

Xog uruurinta ayaa ku waydiin doonta khibradaha daryeel bixiyaha iyo ilmaha laga helay xanuunka CMV ee lagu dhasho. Su'aalaha ayaa wax kaa waydiin kara baaritaanka ilmaha dhashay, helitaanka bixiyaasha daryeelka caafimaadka, awooda helitaanka taageerooyinka kale, khibradaha bulshada, iyo tayada noloshu.

Waa maxay sababta codsiga xog uruurintu uga yimid MDH iyo RTI International?

MDH ayaa iskaashi la samaysay RTI International si ay u fuliso mashruucaan. Xogta ay soo uruuriso RTI International ayaa lagu celin doonaa MDH si ay u hormariso nidaamka baaritaanka ilmaha dhashay ee dhammaan qoysaska iyo dhalaanka reer Minnesota.

Maxay tahay sababta aan wicitaan uga helay qof iga caawinaaya buuxinta xog uruurinta?

MDH ayaa iskaashi la samaysay shaqsiyaad iyo ururo ku dhaqan Minnesota kuwaas oo ka caawin kara waalidiinta iyo daryeel bixiyaasha buuxinta xog uruurinta. Haddii aad ku hadasho Isbaanish ama Soomaali aadna doonayso xog dheeraad ah ama in lagugu xiro, la xiriir health.cyshn@state.mn.us adoo ciwaanka iimeylka ka dhigaaya "NBS Propel".

Sidee ayaaad ku hesheen xogtayda xiriirka?

Barnaamijka [Newborn Screening Program \(www.health.state.mn.us/people/newbornscreening\)](http://www.health.state.mn.us/people/newbornscreening) (Baaritaanka Ilmaha Dhashay ee MDH) ayaa kasoo qaataa isbitaallada iyo rugaha caafimaadka dhalaanka iyo carruurta laga helay in ka badan 60 xanuun oo ku jira liiska baaritaanka ilmaha dhashay, uuna ku jiro xanuunka CMV ee lagu dhasho. Waxaan adeegsanaa xogta aan soo qaadno si aan u ogaano haddii carruurta iyo qoysaskoodu helaan taageerada khayraadka ay doonayaan ayna u baahan yihiin.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku aadan xog uruurinta, fadlan ka eeg [Su'aalo & Jawaabo ku saabsan Xog-ururinta \(www.health.state.mn.us/people/childreneyouth/ncfu/dataqa-som.pdf\)](http://www.health.state.mn.us/people/childreneyouth/ncfu/dataqa-som.pdf).

Yaan la xiriirayaa haddii aan su'aalo qabo?

Fadlan la xiriir health.cyshn@state.mn.us ama wac 651-201-3650 si aad u hesho xog dheeraad ah.

Minnesota Department of Health
Children & Youth with Special Health Needs
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
800-728-5420
health.cyshn@state.mn.us
www.health.state.mn.us

August 2025